



Llywodraeth Cymru  
Welsh Government



**1 Disembar 2022**

# **Qaabka aad wax u kireysanayso ayaa isbeddelaaya**

**waxaa loogu talo galay kireystayaasha  
iyo milkiilayaasha guryaha**

Laga bilaabo **1 Disembar 2022**, Xeerka kireynta guryaha ee (Wales) 2016 ayaa beddelli doonaa qaabka milkiilayaasha guryaha ee Wales ay u kirayaan guryahooda.

Sharciga cusub wuxuu **fududnayna heeshiisyada, wuxuuna kor uqaadayna xaaladda kireynta guryaha ee Wales wuxuuna bixinaya ammaan**, iyo ku kalsoonaan baddan oo ay helaan **kireystayaasha iyo milkiilayasha guryahu**.

# Muxuu iiga dhigan


## yahay sharciga cusub?

### Kireystayaasha

Sida uu sharciga cusub dhigayo, ayaa kireystayaasha iyo dadka liisanka heystaa ay noqon doonaan ‘heshiis-layaal’. Heshiisyada kirada ayaa lagu beddeli doonaa ‘heshiisyada deganaanshaha’. Sharciga cusub ayaa kiraysiga ka dhigi doonaa mid fududu wuxuuna bixin doonaa ammaan ka baddan.

Tani waxay ugu dhignaan doontaa heshiis-layaasha:

- helida heshiis qoran oo sharaxaaya xuquuqahaaga iyo masuuliyadda
- kordhinta mudada ogeysiiska ‘cidna ay khaladka laheyn’ oo ahaa laba inuu lix bilood noqdo
- wax ka sii weyn oo ka ilaalinaya guriga ka saarista
- ka sii wanaajiyay xuquuqda iska dhaxlida/kala wareegida, kuwani waxay qeexayaan cida xaqa u leh inay ku sii noolaato guriga, tusaale ahaan, kadib marka uu kireystaha dhinto
- qaab aad uu dabacsan oo loo maareynaayo heshiiska kireysiga ee la wadaago, taas oo mid ka fudud ka dhigaysa in heshiiska cid kula degan laga saaro ama lagu soo doro



### Mulkiilayaasha guryaha

Dhammaan guryaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, oo ay ka mid yihiin kuwa kiraya guryahooda la kireeyo iyaddoo loo marayo shirkaddaha maamulka ama wakiilkada, waxay u baahan doonaan inay:

- u hogaansamaan sharciga cusub
- ay cusubooneysiinta lagama marmaanka ah ku sameeyaan guryahooda iyo dukumentiyadooda

Waxay tani Milkiilayaasha guryaha uga dhignaan doontaa:

- Nidaam fudud, oo labo nooc oo heshiis ah leh: ‘Ku sugaran’ loogu talo galay qeybta kireystayaasha guryaha bulshada “Caadi ah” loogu talo galay qeybta kirada gaarka ah.
- Xaqijinta inay guryaha ku haboon yihiin inuu bani'aadamka dego (FFHH). Tani waxaa ka mid noqon doona tijaabinta ammaanka korontada iyo xaqiinta inuu ku yaalo alaarmka/ganbaleelka qiiqa sheega uu shaqaynayo iyo in qalabka sheega kaarboon monoksaydh lagu rakibay.
- Guryaha la isaga tagay/la iska nacay ee aanay cidna ku jirin ayaa dib loola soo noqon karaa iyadda oo aan loo baahnayn amarka maxkamadeed.

### Waa maxay waxa xigga oo aan sameeynayo?

Waxaanu rabaa inuu kala guurkani uu qof kata u noqdo sida ugu fudud ee surtagal ah.

Haddii aad tahay milkiile guri ama kireyste waxa muhiim ah inaad ogaaato waxaa ay isbeddeladdan micno kuu leeyihiiin.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida sharciga uu isku beddelayo booqo gov.wales/rentinghomes ama la hadal milkiilahaaga guriga.

**Ka wada shaqeynaaya**

**sidiid cid kastaa u heli laheyd guryo ka ammaan badan**